# Dhallinyarada Xilliga kala gudubka [Young People at Crossroads] - waxaad u baahan tahay inaad ogaato waalid ahaan

Ilmahaaga waxaa lagu casuumay inuu kaqeybqaato mashruuc cilmi baaris ah oo loogu magac daray 'Dhallinyarada Xilliga Kala gudubka' [Young People at Crossroads]. Tani maahan waxqabad iskuuleed mana jiraan wax waajib ah oo ka saaran dugsiga inuu cunugaada ka qeyb qaato. Ka qaybqaadashadu waa ikhtiyaari.

## Waxa ku saabsan cilmi baarista

Dhallinyarada Xilliga kala gudubka waa mashruuc cilmi baaris ah oo ka socda Jaamacadda Manchester, UK, iyo Jaamacadda Melbourne, Australia. Mashruuca waxaa ansixiyay Guddiyada Anshaxa Cilmi-baarista ee Jaamacadda Manchester (tixraac 2021-11462-18689) iyo Jaamacadda Melbourne (tixraac 2021-21640-17977-3).

Mashruucu waxay ujeedaddiisu tahay in la ogaado sida qoysasku ula qabsanayaan isbedelka cimilada, gaar ahaan qoysaska halka waalid ama in ka badan ay ka soo haajireen dal kale. Waxaan aaminsanahay inay muhiim tahay inaan ka maqalno dadka laga yaabo inay horeba khibrad ugu leeyihiin la qabsiga dhibaatooyinka sida abaaraha ama cimilada daran ee wadan kale, oo laga yaabo inay leeyihiin aqoon muhiim ah oo ay la wadaagaan dadka ku nool UK ama Australia. Waxaan sidoo kale ognahay sida dhalinyarada maanta ay wax uga bartaan ugana jawaabaan isbedelka cimilada xilligan xaadirka ah haddana mustaqbalkuna waa muhiim.

## Maxay ku lug leedahay?

Haddii ilmahaagu go'aansado inuu kaqaybqaato cilmi-baarista, waxay kubiiri doonaan Wicitaanno Zoom fiidiyow taxane ah oo ka socda hal qof ee cilmibaare iyo dhalinyaro kale oo da'doodu tahay 14-18. Cilmi-baaraha wuxuu khibrad u leeyahay la shaqeynta dhalinyarada wuxuuna hayataa xaqiijino nabad ilaalin ee haboon.

- Wicitaanada fiidiyowgu waxay dhacayaan waqti ku habboon saacadaha dugsiga ka baxsan.
- Waxaa jiri doona wadar ahaan 7 wicitaano inta udhaxeysa Luulyo iyo Diseembar 2021.
- Wicitaan kastaa wuxuu soconayaa 45-60 daqiiqo.
- Ilmahaagu wuxuu kaloo wakhti ku bixin doonaa diyaarinta iyo wareysi oo ay adiga kula yeelan doonaan, waalidkood.

## Baro xirfadaha cilmi baarista cusub

Inta mashruucu socdo, cunugaada wuxuu heli doonaa tababar ku saabsan sida loo sameeyo wareysi cilmi baaris ah oo lala yeesho waalidkiis. Waa muhiim inaad hadda go'aansato haddii aad ku faraxsan tahay inuu ilmahaagu ku wareysto. Haddii aad ogolaato in lagu wareysto, cilmibaaraha ayaa weydiisan doona ogolaansho si uu u duubo wareysiga. Duubista maqalka waxaa lala wadaagi doonaa kaliya cilmibaareyaasha kale ee mashruuca oo dadweynaha looma bandhigi doono.

Ilmahaagu wuxuu dooran doonaa su'aalaha uu ku weydiinayo; waxay diiradda saari doonaan khibradahaaga la-noolaanshaha caqabadaha deegaanka meelo kala duwan. Fursadda lagu horumarinayo cilmi baarista iyo xirfadaha wareysiga waxay u noqon doontaa waayo-aragnimo qiimo u leh xirfadaha mustaqbalka ee ilmahaaga iyo waxbarashada jaamacadda.

## Wax ku darso buuga mashruuca

Qoys kastaa wuxuu fursad u helayaa inuu ku darsado laba bog buuga mashruuca, kaas oo lagu soo bandhigi doono sheekooyinka sida qoysasku ula qabsadeen isbeddelka cimilada ee Australia, UK, iyo meelaha kale ee ay ku noolaayeen qoysaska ka qayb qaadanaya. Buuggan waxaa laga heli doonaa websaydhka mashruuca waxaana lala wadaagi doonaa dhammaan qoysaska iyo macallimiinta ku lug leh mashruuca. Qoysasku waxay dooran karaan inay ku darsadaan buugga hab aan adiga lagu aqoonsan karin. Qoysasku waxay dib u eegi doonaan buugga ka hor intaan la daabicin.

## Macluumaad dheeraad ah

Kaqeybqaadashada mashruucan cilmi baarista waa ikhtiyaari buuxan. Haddii adiga iyo ilmahaagu go'aansataan inaad kaqeyb qaadataan, cilmi baarayaashu waxay sameyn doonaan wax walba oo aan kari karno si aan mashruuc uga dhigno mid lagu farxo, waxaana rajeyneynaa inay ka faa'iidasan doonto barashada ilmahaaga iyo u diyaargarowga jaamacadaha iyo xirfadaha mustaqbalka.

Haddii ilmahaagu ka yar yahay 16, waxay u baahan doonaan rukhsaddaada si ay uga qayb qaataan mashruuca. Da 'kasta oo ilmahaagu jiro, waxaad u baahan doontaa inaad go'aansato inaad ku faraxsan tahay inay ku wareystaan ka hor intaanay oggolaan inay ka mid noqdaan mashruuca.

Waad ku mahadsantahay waqtiga aad siisay inaad aqriso arintan. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid; fadlan la xiriir cilmibaaraha kuu soo diray xaashidan macluumaadka, kaasoo ku farxi doona inuu kula soo xiriiro oo kuu diyaariyo inuu ku soo waco.

MANCHESTER 1824 The University of Manchester

THE UNIVERSITY OF MELBOURNE